Dhuuxii Murtida

Tarjumaadda Qasiiddada “Cunwaanul Xikam” ee uu tiriyay Abul Fatxi Albusti (330 - 400)

Tarjumaad: Cali Maxamuud Qaylshe

Tifaftir iyo eraybixin: Daa’uud Cali

زيـادَةُ المَرء فـي دُنيـاهُ نقصـانُ *** وربْحُـهُ غَيرَ محض الخَير خُسـرانُ

1. Dhalaalkii adduun iyo nimcada dhiilka laga buuxsho
2. Dhabar jabay inay tahay ninkii dhoohanaan garane
3. Khayr baraxi laga dhawray oo dhabaq[1] la' mooyaane
4. Dhito[2] kale ninkii kaydsadow dhuratay waabaaye[3]

وكُل وِجـدانِ حَظٍّ لا ثَبـاتَ لَـهُ *** فإنَّ مَعنـاهُ فـي التَّحقيق فُقْـدانُ

5. Inkastood dhacso iyo soo xasili dhab ugu howshooto
6. Dheef aan negaa doonin oo malaggu kaa dheelmi
7. Kuma sii dhegdhego ruux caqliga loo dhammaystiraye
8. Allow yaan dhugmay mudan tahee dabarka[4] dheereysan!

يا عامِـراً لخَـرابِ الدَّهرِ مُجتهِـداً *** باللهِ هـل لخَـرابِ العمر عُمـرانُ؟

9. Aqal uu xarkii[5] dhaawacee sii dhalliicsanaya[6]
10. Ruuxyahaw dhalaalinahayee dhab ugu foognaaday[7]
11. Adoo dhedo[8] hillaac mooda iyo dhaanki dabagaalle[9]
12. Cimrigii dhutiyay yaa mar kale dheellitiri[10] doona?

---

[1]. Dhabaq: waa qas ama lab, wuxuu u jeedaa: khayr aan wax kale lagu darin.
[2]. dhito: kayd.
[3]. waabaay/waabaayo: sun.
[4]. Dabar: waa xarigga xoolaha lugaha looga xiro si aysan u baxsan.
[5]. Xar: xayawaan yar oo sida aboorka qoryaha iyo alwaaxyada cuna.
[6]. Dhalliicsi/dhalleecsi: sii janjeersanaya oo sii dhacaya.
[7]. ku foognaan: ku hawllanaan.
[8]. Qabow qoyaanka wata ee habeenkii soo dhaca. "Dhaanshow Allaa dhibay, habeenkiina waa dhedo, maalintiina waa dhadi, waa dhayuuro maalmeed" Salsal.
[9]. Dhaandabagaalle: dhalanteed: muuqaal sida biyaha u birqaya, biyana aan ahayn, oo xilliyada kulaylaha laga arko meelaha bannaanka ah.
[10]. Dheellin: marka ratiga rarka saarani dhinac u qalloocdo, dheellitirkuna waa in dheelligaas laga bi'iyo, oo rarka la toosiyo. Wax kasta oo dhinac u batana waa loo adeegsadaa dheelliga.

ويا حَريـصاً على الأموالِ تَجمَعُهـا *** أُنْسِيـتَ أنَّ سُرورَ المـالِ أحْـزانُ

13. Dhaqashiyo hadduu ruux ku mamo[11] dheefta jerinteeda[12]
14. Asuu diinta dhinacmaro amuu dhigashadeed diido
15. Dhakafaar inuu mudanayoo dhib u dambaynaayo
16. Inay dhayda ka caddahay miyaan diinta laga dheehan?

زَعِ الفـؤادَ عـنِ الدُّنيـا وزينتهـا *** فصَفْوُها كَدَرٌ والوَصـلُ هِجْـرانُ

17. Dhaldhalaalka dunidiyo xumbada dhumisay liid oo dhan
18. Dhaydeedu waa calaw[13] xabiib kaa dhaqaajida'e
19. Qalbigiyo naftaan dhaarsan ee dhiraha laacaaya
20. Dhigdhikada[14] intaysaan ku jabin dhuuja dabarkooda

وأَرعِ سَمعَـكَ أمثـالاً أُفَصِّـلُها *** كمـا يُفَصَّـلُ يَاقـوتٌ ومَرْجـانُ

21. Afartaas sidii dheemmankiyo dhagaxyadii luulka
22. Waxaan ugu dhalaaliyay inaad dulucda dhuuxdiine
23. Dhabbahaan idiin qeexayaa dhib iyo khayrkiise
24. Bal dhegeysta maantoo kalaan dhihi aqaannaaye.

أحسِنْ إلـى النّـاسِ تَستَعبِدْ قُلوبَهُمُ *** فطالَمـا استعبدَ الإنسـانَ إحسانُ

25. Dheddig iyo labood uumiyaha ciidda lagu dhoobay
26. Nin kastoo dhaqaalaynayay daba dhabbeeyaane
27. Dhimrintiyo turriinada ogow yaan dhasiig[15] didine.

---

[11]. ku mamid: in qofku wax ku waasho, oo uu ku noqnoqdo.
[12]. jerin: doonid iyo raadin, "Halkaan maxaad ka soo jerisay?"
[13]. Calaw: biyaha aan saafiga ahayn ee midabkoodu beddelanyahay.
[14]. dhigdhiko: dhagxaan si qaabdaran isu saaran oo ciddii ku istaagta la dumaysa.
[15]. Dhasiig: madax-adayg; "Yaan dadka madax-adayggaaga iyo dhaqankaaga xuni kaa didin".

يا خادمَ الجسم كم تشقى بِخدمته *** أتطلب الربح فيما فيه خسران؟

28. Dhaystiyo[16] inaad shilista[17] iyo dhabanka weynayso
29. Waa dhabarjab ee laguma helo dheg[18] iyo raandhiise[19]

أقبل على النفس واستكمل فضائلها *** فأنت بالنفس لا بالجسم إنسان

30. Ruuxdaa insaan kaa dhigtoo dheefna kaa mudane
31. Sharafteeda dhawr waa danbaad dhogor u aydaahe.[20]

وإنْ أساءَ مُسيءٌ فلْيَكنْ لكَ في *** عُروضِ زَلَّتِهِ صَفْحٌ وغُفرانُ

32. Sidaan dhirirka loo simin faraha dhumucdu waa gaare
33. Dhaqan uumiyuhu kala teg dhawrsashada guude
34. Ruux dhogorti quursaday[21] hadduu dhagar ku taabsiiyo
35. Cafis baa dharbaaxyada ka wacan laysku dhaawaco'e

وكُنْ على الدَّهر مِعواناً لذي أمَلٍ *** يَرجو نَداكَ فإنَّ الحُرَّ مِعْوانُ

36. Gobtu dhabar-adayg waa waxay dhaxal u yeesheene
37. Ruux talo ka dheelliday hadduu kaa dhursuganaayo[22]
38. In loo dhegonuglaadaa habboon kii dhalleecsadaye
39. Ha ku dhiirran maantaas inaad yara dhabcaalowdo[23]

واشْدُدْ يَدْيكَ بحَبلِ الله مُعتَصِماً *** فإنَّهُ الرُّكْنُ إنْ خانَتْكَ أركانُ

40. Dhabbayaalka[24] badan ee naflihi dhinacba meel aaday

---

[16] . Dhays: neefka rimman ee dhali raba candhadiisa/naasihiisa soo weynaada. Halkaanse waxay u taagantahay baruurta iyo iscayilinta,
[17]. Shilis: cayilka.
[18]. Dheg: sumcad.
[19]. Raandhiis: faa'iido.
[20]. Dhogor u aydaa: sumcaddeeda shinsataa.
[21]. dhogorti quursaday: qof aan wax isku falayn.
[22]. dhursug: wax rajeyn.
[23]. dhabcaalnimo: bakhiilnimo, muudalnimo.
[24]. Dhabbe/dhabbeyaal: waddooyin.

41. Dheelmadkiisa kii lagu bi'iyo dhamac[25] adoon jiirin
42. Ku dheg xarig Ilaahey jannaad dhagagsanaysaaye[26]

مَنْ يتَّـقِ اللهَ يُحْمَـدْ في عواقبِـهِ *** ويَكْفِـهِ شَرَّ مَنْ عَزُّوا ومَنْ هانُوا

43. Dhabbartiyo[27] ninkii maalintii xume ka dheeraada
44. Waa loo dhiteeyaa intuu dhawrsadoo baqaye
45. Dhamme madax ah iyo kay ku tahay gabar yar oo dhoor leh
46. Dhibka aadanaha Eebbahay dhaabad[28] uga yeelye.

مَنِ اسْتعـانَ بِغَيْرِ اللهِ في طلـبٍ *** فـإنَّ ناصِـرَه عَجْـزٌ وخِـذلانُ

47. Dhagax iyo rasuul iyo wadaad diinta lagu dhawray
48. Dhawr shilin inuu kugu kabiyo dharaq[29] yar mooyaane
49. Dhibaatada adduunkiyo ninkii dhamac ka kaalmaysta
50. Nin hamboohi[30] dhacantiisu[31] tahay wax isma dhaamaane.

مَن كان للخيـرِ مَنَّاعًا فليس لـه *** على الحقيقـةِ إخـوانٌ وأخْـدانُ

51. Ruuxii dhabiilee[32] wanaag dhiilka kala maaga[33]
52. Dhalyo iyo asxaabtuba cidlay uga dhaqaaqaane.

مَن جادَ بالمالِ مـالَ الناسُ قاطبـةً *** إلَيْـهِ والمـالُ للإنسـانِ فَتَّـانُ

53. Dhabcaalnimo ma fiicnee ninkii dhiibid ku ammaanan
54. Way daba dhabbeeyaan naflaha dhuuniraaca ahe.

---

[25]. Dhamac: dhuxulo dabaysan.
[26]. Dhagagsi: rejayn.
[27]. Dhabbar: saqbar.
[28]. Dhaabad: tiir ama taako.
[29]. Dharaq: caano yar oo loo neef la maalay candhadiisa ku haray.
[30]. Hamboohi: geed aad u tabaryar magaciis.
[31]. Dhacan: oodda afka laga saaro xerada xoolaha. "NIn hamboohi dhacantiisu tahay= qof geedkaas tabarta yar xeradii xoolihiisu ku jireen afka ka saartay"
[32]. Dhabiilid: bakhiilid.
[33]. Ka maagid: ka hakasho.

مَن سالَمَ الناسَ يَسْلَمْ مِنْ غَوائلِهم *** وعـاشَ وهو قَريرُ العَيْنِ جَـذلانُ

55. Nin kastoon dhibaatiyo naflaha dhugato[34] gaarsiinnin
56. Dhagartooda wuu uga gudbaa dhabab[35] llaaheeye.

مَن كان للعقلِ سلطانٌ عليه غَـدَا *** وما على نفسِـهِ للحِرصِ سُلطـانُ

57. Ruuxii dhammayseen caqliga dheelli ka asiibin
58. Dhuuniga barkiis buu qubaa kana dhaqaaqaaye

مَن مَدَّ طَرْفًا لِفَرْطِ الجهلِ نحو هوًى *** أغْضَى على الْحَقِّ يومًا وهْوَ خَزْيانُ

59. Jahli aad u dhaadhacay dartiis ama ku dheeraaday
60. Dhalanteed ninkii dabagalee dhaygag ugu roora
61. Xaqa dhaayihii qaban lahaa sow ka dhici maayo?

مَن عاشَرَ الناسَ لاقَى منهمُ نَصَبًـا *** لأنَّ سُوسَهـمُ بَغْـيٌ وعُـدوانُ

62. Dad ninkii dhexqaadaa hambada[36] dhiillo iyo ciile
63. Dhaqankooda cadowtooyaduu dhab u cantuugaahe.

ومَنْ يُفَتِّشْ عنِ الإخـوانِ يَقْلِهِـمُ *** فَجُلُّ إخوانِ هـذا العَصْرِ خَـوَّانُ

64. Dhanka loo badshiyo aadanaha xumaha loo dhiibay
65. Ninkii aan isdhaafinu cidluu soo dharroocsaniye
66. Dhiiqada ha faarfaarin yaan dhuudhi[37] kaa geline.

مَنِ استشارَ صروفَ الدهرِ قام له *** على حقيقـةِ طبعِ الدهـرِ بُرهـانُ

67. Taariikhihi la soo dhaafay iyo dhamac la soo jiiray
68. Dhabbihii la soo maray nin ogi dhaanto wuu niciye

---

[34]. Dhugato: cudur geela ku dhaca. Halkaanse waxay u taagantahay“Dhibaato kasta”.
[35]. Dhabab: dabool ama awditaan.
[36]. Hambasho: sokor iwm in afka hal mar lagu shubto.
[37]. Dhuudhi: nooc tixiriga ka mid ah.

69. Waqtiguu wuxuu dhaadayaa[38] dhalanroggiisiiye.[39]

مَنْ يزرعِ الشَّـرَّ يَحْصدْ في عواقِبِـهِ *** نَدامـةً ولِحَصْـدِ الزرعِ إِبَّـانُ

70. Ninkii dhoon[40] ka buuxsada shartee dhab u maggaabaysta[41]
71. Habeen badan waxay soo dhaxdoo dabar u dheerayso
72. Mar uun buu dhagaagyada[42] indhaha dhaayihii damin'e

مَنِ استنـامَ إلى الأشرارِ نامَ وفـي *** قَميصِـهِ مِنهُـمُ صِـلٌّ وثُعبـانُ

73. Dhagarqabe ninkii aamminee dhinaca saarsaara
74. Dharkiisaa waxaa laga helaa dhuudhi iyo jiire.

كُنْ رَيِّقَ البِشْرِ إنَّ الْحُـرَّ هِمَّتُـهُ *** صَحيفَـةٌ وعليها البِشْـرُ عُنـوانُ

75. Gobi waa dhedhemo-diid haddaan dhoosha loo birine[43]
76. Waxba dhayda haw shubin adoon dhab ugu muusoonnin.

ورافِقِ الرِّفْـقَ في كلِّ الأمورِ فَلَمْ *** يَنْدَمْ رفيـقٌ ولَمْ يَذْمُمْـهُ إنسـانُ
ولا يَغُرَّنْكَ حَظٌّ جَـرَّهُ خَـرَقٌ *** فالْخَرْقُ هَـدْمٌ وَرِفْقُ الْمَـرْءِ بُنْيـانُ

77. Nin dhimriyay shallaytiyo ka bayr weedh dhaleeco ahe
78. Naxariisti ruux laga dhuftaa dhaaw[44] qaboo ba'aye
79. Hana raacin dhalanteed abees loo dhunshaa badane

---

[38]. Dhaadayaa: garanayaa..
[39]. Dhalanroggiisii: isrogroggiisii.
[40]. Dhoon: haan.
[41]. Maggaabaysi: maggowsi, cantuugid.
[42]. Dhagaagyo: dharbaaxyo.
[43]. Dhoosha loo birin: loo dhoollacaddayn. Yacni gobtu soor wejixumo la socoto ma qaadato.
[44]. Dhaaw: habaar.

أحْسِنْ إذا كانَ إمْكـانٌ ومَقْدِرَةٌ *** فَلَنْ يدومَ على الإحسـانِ إمكـانُ

80. Waa dhool[45] hillaaciyo xareed dhaal[46] gashoo kale’e
81. Intaad dhumucda leedahay amaad duunyo dhaqanayso
82. Abaal dhigo mar uun baad mirihi dheefsan kuu baxaye.

فالروضُ يَزدانُ بالأنـوارِ فاغِمَـةً *** والْحُرُّ بالعـدلِ والإحسـانِ يَزدانُ

83. Sida beerta ubax soo dhashiyo dharab[47] u muuneeyo
84. Gobta dhaashigeed[48] waa cadliga dhaar haddaan maro’e.

صُنْ حُرَّ وجهِكَ لا تَهْتِكْ غِلالَتَهُ *** فَكـلُّ حُـرٍّ لِحُرِّ الوجـهِ صَـوَّانُ

85. Wejigoo la dhawruu nin ragi abid ku dhaataahe
86. Foolkaaga lama dhaawacoo dheehu[49] waa hibo’e.

فإنْ لقيتَ عـدوًّا فَالْقَـهُ أبـدًا *** والوجهُ بالبِشْرِ والإشـراقِ غَضَّـانُ

87. Dhudhub geel ku soofiyo adoo suuqa dheelmanaya
88. Nimaad ceel isugu dhaarateen dhamasna[50] kuu heysan
89. Haddii uu dhabbaha kugu arkiyo baarka dhinaciisa
90. Inaad dhabanka kala jeesataa waa dhegxumo[51] weyne

دَعِ التكاسُلَ في الْخيراتِ تَطلُبُهـا *** فليس يَسْعَدُ بالْخيـراتِ كَسـلانُ

91. Ruux aan guntiga dhuuqsanoo dhididku saamaynnin
92. Dhici mayso khayraad inuu abid dhitaystaahe
93. Dhallaan kulama korisee wehsida dhaanka ka huggaanso.

---

[45]. Dhool: daruur roobeed.
[46]. dhaal: balli.
[47]. Dharab: qoyaan.
[48]. dhaashigeed: waxa ay ku saliidaysato oy isku qurxiso.
[49]. Dheeh: muuqaalka qurxoon. Halkaanse waxay ugu jirtaa “Magaca qurxoon ee aad bulshada ku dhex leedahay”.
[50]. Dhamas: ul weyn. Wuxuu ka wadaa “Haddii uusan qofku markaas hub kuu wadan”
[51]. Dhegxumo: sharafdarro.

لا ظِـلَّ للمـرءِ يَعْرَى مِنْ تُقًى ونُهًـى *** وإنْ أظَلَّتْـهُ أوراقٌ وأفْنـانُ

94. Dhundhus iyo nagaar iyo adoon gumarna soo dhaafin
95. Bilcil dhuux-madoobe[52] ah haddaad dhab ugu soo waabto
96. Dhugmo iyo aqoon ruux ka tegay dhimay warkiisiiye.

والنـاسُ أعوانُ مَنْ وَالَتْـهُ دَوْلَتُـهُ *** وَهُـمْ عليه إذا عادَتْـهُ أعْـوانُ
سَحْبـانُ مِنْ غيرِ مالٍ باقِلٌ حَصِرٌ *** وباقِـلٌ في ثَـراءِ المـالِ سَحْبـانُ

97. Dadku ruux wax loo dhiibay way dhinac-istaagaane
98. Maantay ka yara dheellisay boqon-dhawyeeyaane[53]
99. Afgarooc[54] dhadhamadii[55] sitoo shilimmo loo dhiibay
100. Ayay uga dhowaadaan abwaan dhaarya maansada’e

لا تُـودِعِ السِّرَّ وَشَّاءً يَبـوحُ بـه *** فما رَعَى غَنَمًا في الدَّوِّ سَرحـانُ

101. Dhurwaa laguma aammino ridii dhays lahoo ladane
102. Intaan weedhu dhuuntaada marin dhugo hareertaada.

لا تَحْسَبِ الناسَ طَبْعًا واحِدًا فَلَهُمْ *** غَرائِزٌ لَسْـتَ تُحْصِيهِـنَّ أَلْـوانُ

103. Dadku way is dhaamaan misana kala dhaqmaad roone
104. Waa sida ramaas soo dhashiyo dhibic mahiigaane[56]

مـا كُلُّ مـاءٍكصـدَّاءٍ لِـوَارِدِهِ *** نَعَـمْ وَلا كُلُّ نَبْتٍ فهْوَ سعـدانُ

105. Dhagaxyaale[57] maaxdiis ma sido dhaan kastoo fulaye
106. Dhirtuna daran[58] ma wada sheegatee waa dharkayn gabale.

---

[52]. Dhusundhus, nagaar, gumar iyo bilcil waa geedo magacyadood.
[53]. Boqondhawyo: faylo-goyn.
[54]. afgarooc: qof aan hadli aqoon, wuxuu ka soo horjeedaa “Aftahan”.
[55]. Dhadhamo: hanti.
[56]. Mahiigaan: roob badan.
[57]. dhagaxyaale: balli ku yaal meel u dhow magaalada Guriceel.
[58]. Daran: geed xooluhu jecelyihiin.

لا تَخْدِشَنَّ بِمَطْلٍ وجْهَ عارِفَـةٍ *** فالْبِـرُّ يَخدِشُـهُ مَطْـلٌ ولِيَّـانُ

107. Wanaag geedka aad soo dhigtiyo same lagaa dhawray[59]
108. Meermeeris lagu dhaawacaa waa dhib iyo hooge.

لا تَسْتَشِـرْ غيرَ نَدْبٍ حازِمٍ يَقِظٍ *** قدِ اسْتـوَى فيه إسْـرارٌ وإعْـلانُ

109. Dhakadiyo nimaan ciribta iyo dhuuxa laga baarin
110. Oon garasho dheeraatay iyo dhiifo lagu sheegin
111. Inaad talo ka soo dheegataa dhabarjab weeyaane.

فلِلتَّدابِيـرِ فُرسـانٌ إذا رَكِبـوا *** فيهـا أبَرُّوا كما لِلْحَرْبِ فُرْسـانُ

112. Dhakhtarnimo haddii ay tihiyo dhacan la soo gooyo
113. Ama shiishka meel loo dhakaday dhoombir[60] ka hinraago
114. Ama ay dhismaha qaranka tahay gedaha loo dhaabo
115. Dhan waliba khabiir looga haray dheego taladiisa.

ولِلأُمـورِ مَـواقيـتٌ مُقَدَّرَةٌ *** وكُـلُّ أمْـرٍ لـه حَدٌّ وميـزانُ

116. Arrimahan dhafoorkiyo qalbiga dhiillo gelinaaya
117. Dhul aan laga gudbayn buu u yaal dhidibki miisaane.

فلا تَكُـنْ عَجِـلاً بالأمْرِ تَطْلُبُهُ *** فَلَيْسَ يُحمَدُ قبل النُّضـجِ بُحـرانُ

118. Dhaqsiinyuhu shallaytuu waqiis dhali yaqaannaaye
119. Degdegsiinyo waa tay dheheen dhicis u geeryooye.[61]

كفىَ مِنَ العيش ما قَدْ سَدَّ مِنْ عَوَزٍ *** فَفِيـهِ لِلْحُـرِّ إنْ حَقَّقْتَ غُنْيـانُ

120. Gobi dheregta kuma faanto iyo dhuuni kaydsamaye

---

[59]. lagaa dhawray: lagaa sugayo.
[60]. Dhoombir: qori magaciis.
[61]. Waa maahmaah “Degdegsiimo dhicisaa eeday”.

121. Cantoob dhabarka kuu toosisaa kaaga dhigan luule.

وذُو القناعـةِ راضٍ مِنْ مَعيشَتِـهِ *** وصاحِبُ الْحِرصِ إنْ أثْرَى فَغَضْبانُ

122. Nin qanaaco dheeftiisu tahay dhaqan abiidkiise
123. Kuwii dhaanka dabagaalle siray dhirif[62] ma daayaane.

حَسْبُ الفَتى عَقْلُهُ خِـلاً يُعاشِـرُهُ *** إذا تحـامـاهُ إخـوانٌ وخِـلّانُ

124. Dhalyo iyo asxaabtuba hadday dhiiqo kugu sayrto
125. Dhamacdiyo caqlaa kaaga filan dhaxanta dayreede.

هُمـا رَضيعَا لِبانٍ حِكمةٌ وتُقًـى *** وسَاكِنـا وَطَـنٍ مـالٌ وطُغْيـانُ

126. Xikmadday taqwada wada dhasheen dherebna seexdeene
127. Duqyaankana[63] ninkii maal dhaqday dhacan wadaagaane[64]

إذا نَبَـا بِكريـمٍ مَوْطِـنٌ فَلَـهُ *** وراءَه في بَسيـطِ الأرْضِ أوْطـانُ

128. Dhulku gebigi waa wada cadduun[65] amase dhoobeeye[66]
129. Dhinacaad ka joogtaa hadduu kuu dhedhemi waayo
130. Dhaqsaa laga huleelaa sidii dhagax ha taagnaane.

يا ظالِمًا فَرِحًا بالعِـزِّ ساعَـدَهُ *** إنْ كُنْتَ في سِنَـةٍ فالدَّهْـرُ يَقظـانُ

131. Ruuxyahaw wuxuu dhamac shidiyo dhagar ku faanaaya
132. Dhadhabkiyo haddii ay hurdadu kula dhaqlaynayso
133. Dhibkii aad maleegtaa hurdadi dhigay habeenkiiye.

---

[62]. dhirif: xanaaq, caro.
[63]. Duqyaan: Xadgudub, waa Carabi.
[64]. Dhacan: waa oodda xerada xoolaha afka laga saaro sida aan soo sheegnay. “Dhacan bay wadaagaan” macneheedu waa “Waa deris”.
[65]. Dhul ciid jilicsan. .
[66]. Dhoobey: dhul beerasho ku habboon.

ما اسْتَمْرأ الظَّلمَ لو أنصفتَ آكِلُهُ *** وهل يَلذُّ مذاقَ المرءِ خُطْبانُ

134. Dulmi ruuxi dhaansaday macaan wuu ka dheeryahaye
135. Dhedhen qaredameer[67] wuu yaqaan show dhallaankuba'e.

يا أيها العالِمُ المَرْضِيُّ سيرَتُهُ *** أبشِرْ فأنتَ بغيرِ الماءِ ريَّانُ

136. Nin aan geelu sanadkaan u dhalin dhayna labadaantay[68]
137. Waa ruux cilmiga looga dhigay dhaxal adoogiise.

ويا أخا الجهلِ لو أصبحتَ في لُجَجٍ *** فأنت ما بينها لا شكَّ ظمآنُ

138. Mar uu dhool gu'yaad iyo hillaac dhibicda tuuraayo
139. Ayuu jaahil dhegaweyne oon dhuunta jarayaaye.

لا تَحسبنَّ سُرورًا دائمًا أبدًا *** مَن سَرَّه زمنٌ ساءَتْهُ أزمانُ

140. Waqti dhinacba goor loo rogoo dhib iyo khayraad leh
141. Aad ha ula dhaantayn hadduu dharaq yar kuu maalo.

إذا جَفَاك خليلٌ كنتَ تألَفُهُ *** فاطلُبْ سِواهُ فكلُّ الناسِ إخوانُ
وإنْ نَبَتْ بك أوطانٌ نشأتَ بِها *** فارْحَلْ فكلُّ بلادِ اللهِ أوطانُ

142. Dhulka iyo wadayguba hadduu dhaqan lahaa waayo
143. Kuma sii dhegee baarqab wuu sibiq dhaqaaqaaye
144. Dhulka Eebbe wuu weynyahaye dheelmo waad lediye.

يا رافلاً في الشَّبابِ الرَّحبِ مُنْتَشِيًا *** مِن كأسِهِ هل أصاب الرشدَ نشوانُ

145. Dhallinyarada ruuxyahaw ku lumay dhamayna waabayda
146. Caqligaad dhantaashayi ma laha dhaayo miirqaba'e.

---

[67]. Geed aad u xaraar oo wax kastoo xaraar/qaraar loogu maahmaaho.
[68]. Labadaantay: labada daan ka buuxsaday.

لا تَغتـرِرْ بشبابٍ رائـقٍ نَضِـرٍ *** فكـم تقدَّم قبلَ الشَّيـبِ شُبَّـانُ

147. Dhalaalkiyo wax uun baa ku siri dheeha foolka ahe
148. Dhimashadu gabow uma sugtee dhirifka aashaada.

ويا أخا الشَّيبِ لو ناصَحتَ نفسَكَ لم *** يكن لِمثلِكَ في اللَّذَّاتِ إمعـانُ

149. Dhab haddaad u maragfuri ninyahaw dhabanku miinaystay[69]
150. Dhiggaagii macaansiga adduun wuu ka dhaar maraye

هَبِ الشَّبيبةَ تُبدي عُذرَ صاحِبِهـا *** ما عُذرُ أشْيَبَ يَستَهْويـهِ شيطـانُ؟

151. Dhallinyaro haddii ay raggeed dhumiso waa daw’e
152. Adoo dhaban-cirroole ah maxaa dhiiqo kula doontay?

كلُّ الذنوبِ فإن اللـهَ يغفرهـا *** إن شَيَّـعَ المـرءَ إخـلاصٌ وإيمـانُ

153. Inkastood dunuub buur ka dhigan abid dhex taagnaato
154. Iimaan ikhlaas lagu dhejiyay laguna sii dhaabay
155. Dembidhaaf mar baa lagu helaa aad u dhumuc weyne

وكلُّ كَسـرٍ فإنَّ الدِّينَ يَجْبُـرُهُ *** وما لِكَسْرِ قَنـاةِ الدِّيـن جُبـرانُ

156. Dhan kastoo dalooshada waxaa dhababta diintiiye
157. Markii diinta loo soo dhigtay dhabaqday howshiiye.

خُذها سَوائـرَ أمثـالٍ مُهذَّبـةً *** فيهـا لِمَنْ يَبتَغـي التِّبيـان تِبيـانُ

158. Dha’da gabayga iyo maansadaan dhuuxa ka abbaaray
159. Waa nuur dhabbaha kuu ifiya dheelmashiyo leyle

[69]. Miin: haragga wejiga oo duudduubma dadka waayeelka ah.

ما ضَـرَّ حَسَّانَها والطبعُ صائِغُها *** أنْ لم يَصُغْهـا قَريعُ الشِّعرِ حَسَّـانُ

160. Dhambaalkay xambaartiyo cilmiga dheegga[70] laga saaray

161. Tixihi Bacadle kama ay dhacdiyo dhaxalgalkiisiiye.

[70]. Dheegga: meesha geela laga raro; sararta.